



(TERRA TRAVEL AGENCY)

(ARTICLE OF ASSOCIATION)

SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA

(TERRA TRAVEL AGENCY)

SHARCI LAM:18

Tr.26.12.2019

MUQDISHO -SOOMAALIYA

2022



Maanta oo ay taariikhdu tahay 19/02/2022 Aniga oo ah:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"** lehna xafiiska Nootaayo Tayo ee ku yaalla Xamar, Degmada H/Wadaag, Waxaa Xafiiska iigu yimid Mudahana hoos ku xusan.

**Mr. CALI MAXAMED XASAN FIIDOW**, Sita baasaboorka lamarkiisu yahay **P00682437**, kuna lifaaqan Dukumintigaan. Mudanaha kor ku xusan isaga oo caafimaad qaba, caqligiisana taam yahay, cid heshiiskan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, wuxuu i weediistay inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

**QODOBKA 1AAD  
MAGACA SHIRKADDA**

Iyada oo la raacayo sharciga Shirkadaha (Company law) qodobkiisa 13-aad, magaca Shirkadda hadda ka dib loogu yeeri doono waa **TERRA TRAVEL AGENCY**, waxayna yeelan doontaa astaan u gaar ah

**QODOBKA 2AAD  
WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA**

Shirkadda **TERRA TRAVEL AGENCY**, waxaa la aas-aasay **05-02-2018**, waxaana lagu aas-aasay magaalada Muqdisho, waxaana laga diwaan galindoonaa dhammaan Hay'adaha dowladda Fedaraalka Soomaaliya ee ay Khuseyso Iyo Ururka Isku Taga **Tarafal Ajansiyada ee-Soomaliya (SATA)**.

**QODOBKA 3AAD  
XARUNTA SHIRKADDA**

Xarunta dhexe ee Shirkadda **TERRA TRAVEL AGENCY** waxay ku taalaa magaalada Muqdisho, caasimadda Soomaaliya, Degmada Waabari, waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dhammaan dalka gudahiisa iyo dibaddiisaba, waxaana lagala soo xariiri karaa.

**QODOBKA 4AAD  
CIWAANNKA LAGALA SOO XIRIIR KARO SHIRKADDA**

Magaca	Jagada	E-Mail	Number
<b>Mr. Cali Maxamed Xasan</b>	<b>MILKIILAHA SHIRKADDA</b>	<b>Terratravelagence@gmail.com</b>	<b>0615943899</b>

**QODOBKA 5AAD  
NOOCA SHIRKADDA**

Sida uu qabo sharciga Shirkadaha (Company law) qodobkiisa 7aad, fakhraddiisa koowaad (T) Shirkadda waa Shirkad Mas'uuliyadeeda Xaddidan tahay **Limited liability Companay**.

**QODOBKA 6AAD  
UJEEDDOOYINKA SHIRKADDA**

- 1- Soo saarisrta (Tiket) dal iyo dibad.
- 2- Soo Saarista Warqadaha Dal Ku galka wadamada (Visa).
- 3- Ka Shaqeynta Arrimaha Xamuulka (Cargo).
- 4- Ka shaqeynta Arrimaha Dalxiiska.
- 5- Ka shaqeynta Arrimaha Xajka iyo Cimrada.

**QODOBKA 7AAD  
HANTIDA IYO RAASIMAALKA SHIRKADDA**

Hantida shirkaddu waa lacag dhan **USD 5,000** (Shan kun oo doolarka mareykanka ah) waxaana iska leh Milkiilaha Shirkadda.

**QODOBKA 8AAD  
QAAB-DHISMEEDEKA SHIRKADDA**

Shirkadda **TERRA TRAVEL AGENCY** waxa ay u dhisan tahay sida hoos ku xusan:


1. Milkiile Ahna Guddoomiye: Cali Maxamed Xasan Fiidow.

Sidoo kale Waxaa Jira Hool Wadeeno Ka Howl gala Xarumaha Kala Duwan EE-Shirkada Leedahay.

**QODOBKA 9AAD  
WAA JIBAADKA GUDDOOMIYAHA SHIRKADDA**

Waa jibaadka guddoomiyaha shirkadda (Chairman).

1. In uu Shirkadda ku matalo hay'adaha Dowliga iyo kuwa aan Dowliga aheyn hortooda.
2. In uu shir guddoomiyo shirarka guddiga maamulka.
3. In uu yeeshaa kormeeridda iyo habsami u socodka hawlaha shirkadda.
4. In uu yeeshaa hubinta go'aanada guddiga maamulka.
5. In uu yahay qof ugu danbeeya ee iska leh Go'aanka Shirkadda.



**QODOBKA 10AAD**  
**AXKAAMTA AY KU DHISANTAHAY SHIRKADDU**

Shirkaddu waxay ku dhisantahay Shareecada Islaamka, xeer hoosaadkeeduna wuxuu waafaqsan yahay Shareecada .

**QODOBKA 11AAD**  
**BAABI'INTA SHIRKADDA**

Waxaa ay baaba'aysaa Shirkaddu marka la helo qodobada soo socdo:-

1. Go'aan baabi'in ee ka soo baxo Milkiilaha Shirkadda.
2. Haddii Shirkaddu uu musalafto. Islamarkaana ay u suurta gali weyso inuu shaqeeyo
3. Haddii uu soo baxo sharci sax ah oo baabi'naayo Shirkadda noocaan ah.

**QODOBKA 12-AAD**  
**WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA.**

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Shirkadda waxaa loo raacayaa Shareecada Islaamka, Sharciga Shirkadaha lam. 18. Tr.26.12.2019 iyo qaanuunka madiniga ee soo baxay sanadkii 1974 02-Julay lambarkiisu yahay 37.

**QODOBKA 13-AAD**  
**DHAQAN GALKA SHARCIGA DHISMAHA**

Sharciga dhismaha wuxuu dhaqan galayaa marka u saxiixo aas-aasaha Shirkadaha

**QODOBKA 14-AAD**  
**TIRADDA BOGAGGA EE HESHIISKU KU QORAN YAHAY**

Heshiiskan wuxuu ku qoranyahay Af-Soomaali wuxuuna ka koobanyahay 14 qodob oo ku qoran 3 bog. Heshiiskan waxaa ila saxiixay Milkiilaha Shirkadda, kadib markii uu akhristay, raalina ay ka noqday qoraalka sare ku xusan.

*SAXIIXA MILKIILAHA SHIRKADDA*

*Mr. : CALI MAXAMED XASAN FIIDOW*

**( XAFIISKA NOOTAAYAHA )**

**REP. 083/TPN/2022 Tr. 19/02/2022**, Muqdisho, Aniga oo ah:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"** lehna Xafiiska Nootaayaha ee ku yaalla degmada H/wadaag Suuqa Bakaaraha Dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, islamarkaana uu saxiixay milkiilaha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magaciisa iyo Baasanoorka uu Wato in ay is Waafaq San yihiin Waxaan Kaloo Cadeynayaa in Saxiixiisa uu yahay Kan dhabta ah ee Sare ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guu d ee Nootaayada.

**SAXIIXA NOOTAAYAHA**  
**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**



Somali Police Force  
CRIMINAL INVESTIGATION DIRECTORATE  
Fingerprints Search Section



قوات الشرطة الصومالية  
ادارة التحقيقات الجنائية  
قسم بحث البصمات

**Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed**  
**HOGGAANKA BAARISTA DEMBIYADA**  
**Waaxda Baarista Faraha**

CERTIFICATE of NON-CRIMINAL RECORD — SHAHAADADA DEMBI LA'AANTA — شهادة سجل غير جنسي

REF. NO. SPF17022022103054515218

Date: 17 Feb 2022 3:15 pm

Ali Mohamed Hassan Fidow

Magaca/Name/اسم

Amino Osman Jilow Addow

Magaca Hooyada/Mother's Name/اسم الام

1990-01-01

Tsariikh Dhalashada/Date of Birth/تاريخ الميلاد

Beledweyne

Goobta Dhalashada/Birth of Place/مكان الميلاد

SHAQQ

Sababta Codsigaan / Reason for this Request / سبب هذا الطلب



Kadib markii aan baarney faraha qofka kor ku xusan,

waxaa halkaan lagu caddeeyey in uusan **LEHEEN DEMBI HORE.**

After searching and investigating the above named person fingerprints,  
we hereby certify that he/she has **NO-PREVIOUS CRIMINAL RECORD**

بعد البحث والتحقيق في بصمات الشخص المذكورة اعلاه .

نحن نشهد بموجب هذا أنه ليس لديه/لديها سجل جنائي سابق

CODE: LOC

Taliyaha Waaxda Baarista Faraha CID  
G/le Harbi Mohamed Omar



SPF-CID FORM153107

E-mail: [spfcid@gmail.com](mailto:spfcid@gmail.com)



## FOOMKA BIXINTA

REP. 083 /2022.

Tr, 19/02/2022,

~~Magaca liibadaha:~~ →

Cadeyr

Magaca qaadaha: →

Dr. mohameel Hassan Fedow

Meeshuu deganyahay →

Hodan, albaraka

Telfoonkiisa: →

252615943899

SAXIIXA BIXIYAHA: \_\_\_\_\_

SAXIIXA QAADAHA: \_\_\_\_\_

*Ali*